



## (Wax fududeeya oo ha adkaynina, oo bishaareeya oo dadka ha cayrinina )

Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaadee wuxuu Nabiga scw ka wariyey inuu yiri: (Wax fududeeya oo ha adkaynina, oo bishaareeya oo dadka ha cayrinina ).

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu amray in loo fudeydiyo oo loo sahlo dadka aana lagu adkayn dhamaan arimaha diinta iyo tan aduunba, taasoo ah xuduuda Ilaahay baneeyey ee shareecadiisu ogoshahay. Wuxuu ku dhiiri galinayaa dadku inay khayrka iyo wanaaga isugu bishaareeyaan oo aanay dadka ka eryin khayrka.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5866>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

